IIB MA GALO

الجريدة الرسمية

# FAAFINTA RASMIGA AH

JAMHUURIYADDA DIMOQORAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 6aad — Muqdisho, 25 Juunyo 1978 L. 2 R 6

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

FAAFINTA BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

### QAYBTA KOWAADD

### SHARCI

SHARCI L. 26 ee 3 Maajo 78, Sharciga habeeyey Dhaqaalaha Xubnaha C.Q.S. iyo Mutodawiciinta Raaciyada ah ee ku geeriyooda ama ku Naafooba Dagaalka . Bogga 394

SHARCI L. 27 ee 1 Juun 78, Midaynta Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta iyo Wakaaladda Gaadiidka Badda.- » 397

### QAYBTA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 53 ee 6 Abr. 78, Magacaabid La-Taliyaha Guddiga Iibka Qaranka iyo Horudhigidda Dhaqaalaha.- » 398

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 54 ee 6 Abr. 78, Magacaabid La-Taliyaha Dhanka Sharciga ee Guddiga Iibka iyo Horudhigidda Dhaqaalaha. » 399

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 55 ee 2 Maajo 78, Magdhaw Sharikado la Toleeyay.- » 400

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 56 ee 21 Maajo 78, Hoos u dhig hal darajo Cabdullaahi Macallin Maxamed iyo Saddexda kale oo la ganaaxay. » 401

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 57, ee 1 Juunyo 778, Magacaabid Maareeyaha Guud ee Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta iyo Gaadiidka Badda.- » 403

XEER WASAARADDA BOOSTA IYO ISG, L. 58 ee 23 Maajo 78, Sameeyn Tacriifa Cusub ee Telekiska Dalka Gudihiisa.- » 404

XEER WASAARADDA BOOSTA IYO ISG. L. 59 ee 23 Maajo 78, Tigidho cusub oo lagu magacaabo Laaji'iinta Falastiin iyo Xuquuqdooda.- » 406

## QAYBTA SADDEXAAD

## TALOOYIN ISGAARSIIN IYO WIXII LA MID AH.

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 17.6.78, Lumid Buug Lamb. 6824, kuna qoran Sh. So. 4070 ay leedahay Xaajiya Faaduma Sheekh Isgow L. 342 » 407

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 22.5.78, Lumid Buugga Kaydka L. 10206 ku qoran Sh. So. 299 uu leeayhay Maxamed Afrax Dhiblawe 343 » 408

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA, 1,6.78, Lumid Jeegga War. L. 15283 ku qoran Sh. So. 4502/50 uu leeyahay Qaybta Booliska Gob. Waqooyi Galbeed - Hargeysa L. 344 » 409

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 7.6.78, Lumid Buugga Kaydka L. 12.314 ku qoran Sh. So. ay leedahay Madiina Nuur Cali L. 345 » 410

MAXKAMADDA GOBALKA MUDUG, 21.6.78 lumid Buugga kaydka L. 1685 ku qoran Sh. So. 302/60 u leeyahay Maxamed Kulmiye Barkhadle L. 346

OCEANTRAC S.p.A. - SHIRKAD CUSUB OO LA DHISAY, L. 347 » 411

OCEANTRAC S.P.A. - CONTITUZIONE DI SOCIETA SHIRKADDA MORODI, Ogaysiis Isu yeerid fadhi Caadi ah iyo mid aan caadi ahayn. » 412

SHARCI L. 26 ee 3 Maajo 78, Habeeyey Dhaqaalaha Xubnaha C.Q.S. iyo Mutadawiciinta Raaciyada ah ee ku Geeriyooda ama ku Naafooda Dagaalka.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada Lambarkeedu yihiin 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1dii Luulyo 1976 ;

ISAGOO ARAKAY : Sharciga Lambarkiisu yahay 8, ee soo baxay 30 Maarso 1965 ;

ISAGOO AQOONSADAY : In ay lagama maarmaan tahay in la soo saaro Sharci habeeya Xuquuqda Dagaalyahaannada iyo dadka iyaga dhaxla ;

ISAGOO TIXGELIYEY : Go'aanka Guddgia Siyaasadda ee Golaha Dhexe ee X.H.K.S.

WUXUU SOO SAARAYAA SHARCIGA SOO SOCDA :

Qodobka 1aad

DHAQAALAHA CARRUURTA YAR-YARKA AH EE XUBINTA C.Q.S. KA MID AH EE KU GEERIYOODA

**DAGAALKA**

Carruurta yar-yarka ah ee ay ka tagaan Xubnaha C.Q.S. kuna Geeriyooda Dagaalka, waxay xaq u leeyihiin in la siiyo bil walba, hadba midka ay ka mutaystaan Hawlgabyada soo socda, ilaa ay ka gaaraan 16 Sannadood.

— 60% Gundhigga Mushaharkii ugu dambeeyey ee uu qaadan jirey la dhaxluhu haddii uu Hawsha Ciidanmada hayey muddo ka yar 10 (Toban) Sannadood.

— 70% haddii la dhaxluhu Hawsha Ciidammada hayey muddo ka yar 20 (Labaatan) Sannadood ;

— 80% haddii la dhaxluhu Hawsha Ciidammada hayey muddo dhan 20 (Labaatan) Sannadood iyo ka badan,

Qodobka 2aad

## DHAQAALAHA DHAXLAYAASHA XUBINTA C.Q.S. KA MID AH EE KU GEERIYOODA DAGAALKA OO AAN KA TEGIN CARRUUR KA YAR 16 SANNADOOD

1) Dhaxlayaasha Xubinta C.Q.S. ka mid ah ee ku geeriyooda Dagaalka ee aan ka tegin Carruur yar-yar (Kuwo aan gaarin 16 Sannadood), waxay xaq u leeyihiin in la siiyo Liiltir dhan Sh. So. 5.000/- (Shan Kun oo Shilin), haddii la dhaxluhu Hawsha Ciidammada hayey muddo ka yar 10 Sannadood; Sh. So. 10.000/- (Toban Kun oo Shilin). Had dii la dhaxaluhu Hawsha Ciidammada hayey muddo dhan Toban Sannadood ama wax ka badan.

2) Xaqa ku xusan Xubinta Kowaad, waxaa mutaysta dhaxalayaasha uu wadarta Liiltirkoodu ka yar yahay kan ku yaal Xubinta Labaad iyo tan Saddexaad ee Qodobka 19aad ee Sharciga Lambarkiisu yahay 6 ee 31 Disheembar 1969. Dhaxlayaasha uu u roon yahay, waxaa lagu xaqsiinayaa Qodobka 19aad ee Sharciga Lambarkiisu yahay 6 ee 31 Disheembar 1969.

Qodobka 3aad

## DHAQAALAHA XUBINTA C.Q.S. KA MID AH EE KU NAAFOOBA DAGAALKA (NAAFO DHAN)

Xubinta C.Q.S. ka mid ah oo ay ku gaarto Dagaalka Naafo Culus (Waa marka uusan Shaqayn karin), wuxuu xaq u leeyahay inta uu nool yahay Hawlgab dhan 100% oo ah Gundhigga Mushaharkii uu qaadan jiray marka uu Naafoobay.

Qodobka 4aad

## DHAQAALAHA SHAQAALAHA DAWLADDA EE AAN KA TIRSANAYN C.Q.S. KUNA GEERIYOODA AMA KU NAAFOOBA DAGAALKA

1) Shaqaalaha Dawladda ee aan ka tirsanayn C.Q.S., hadday Geeriyoodaan ama Naafoobaan, iyagoo kula jira Dagaalka Ciidammada Qalabka Sida, waxay la mid yihiin xagga Xuquuqda, Xubnaha C.Q.S. ka mid ah waxaana lagu xaqsiinayaa Qodobka 1aad, 2aad iyo kan 3aad ee Sharcigaan hadba midka ay ku lug leeyihiin.

2) Xuquuqda ku taal Qodobka 1aad, 2aad iyo kan 3aad ee Sharcigaan ee ay mutaystaan Shaqaalaha Dawladda ee ku xusan Xubinta Sare ee Qodobkaan, waxay ku leeyihiin Wasaaradda ama Wakaaladda Dawladda oo ay ka tirsan yihiin.

Qodobka 5aad

DHAQAALAHA MUTADAWICIINTA RAACIYADA AH

EE KU GEERIYOODA AMA KU NAAFOOBA DAGAALKA

1) Dhaxlayaasha Mutadawiciinta Raaciyada ah ee ku Geeriyooda Dagaalka iyagoo la safan Ciidammada Qalabka Sida, waxay xaq u leeyihiin in la siiyo Liiltir dhan Sh. So. 5.000/— (Shan Kun oo Shilin).

2) Mutadawiciinta Raaciyada ah oo ay ku gaarto Dagaalka Naafo dhan, waxay xaq u leeyihiin in la siiyo Liiltir dhan 10.000/— (Toban Kun oo shilin).

3) Mutadawiciinta Raaciyada ah ee ku xusan Xubnaha hore, waxaa la geliyaa Diiwaan gaar ah marka ay aadayaan Goobta Dagaalka.

Qodobka 6aad

GUDDIGA CAAFIMAADKA EE QIIMEYNTA

Qiimeynta Naafada ee Sharcigaani ka hadlaayo, waxaa loo xil saaray Guddiga joogtada ah ee Caafimaadka ee ku xusan Qodobka 11aad Xubinta 3aad ee Sharciga Lambarkiisu yahay 6 ee 31.12.1969.

Qodobka 7aad

B U R I N

Sharci ama Xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigaan waa la buriyey.

Qodobka 8aad

DHAQAN GELID

Sharcigani wuxuu Dhaqan gelayaa maalintii uu saxiixo Madaxwaynaha J.D.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.

Muqdisho 3 Maajo 1978

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)
Madaxwaynaha J.D.S.

SHARCI L. 27 Midaynta Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta iyo Wakaaladda Gaadiidka Badda.

MADAXWAYNAHA
**J.D.S.**

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. 22 ee 23kii Febaraayo 1975 Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;
ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. 17,18,19 ee 1dii Luulyo 1976;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. 22 ee 23kii Febaraayo 1975 ee lagu dhisay Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta.

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. 69 ee 12kii Nofember 1977 ee lagu dhisay Wakaaladda Gaadiidka Badda.
ISAGOO TIXGELINAYA: Go,aankii Gudiga Siyaasadda ee Golaha Dhexe ee X.H.K.S. ee 27-28 Maajo 1978

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Laga bilaabo 1da Juun 1978, labadii Wakaaladood oo la kala oran jiray Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta iyo Wakaaladda Gaadiidka Badda waa la mideeyay, waxaana loo baxshay

WAKAALADDA HAWLAHA MARAAKIIBTA IYO GAADIIDKA BADDA.

Wakaaaladda Hawlaha Maraakiibta iyo Gaadiidka Badda waxaa lagu meeleeyay darajada «A»

1- Wakaaladdu waxay la wareegtay Hantida iyo Xilkii maamulka iyo xoolihii (obbligazione attive e passiva) ee labadii Wakaaladood ee la mideeyay.

2- Shaqaalihii labada Wakaaladood ee la mideeyay iyo xuquuqdooda waxaa la wareegtay Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta iyo Gaadiidka Badda.

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 1da Juun 1978, waxaana lagu soo saari doonaaFaafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 1 Juunyo 1978

(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)
Madaxwaynaha J.D.S.

XEER Madaxwaynaha J.D.S. L. 53 ee 6 Abriil 1978 Magacaabid La-Taliye Gudiga Iibka Qaranka iyo Horudhigidda Dhaqaalaha

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lamb. 17,18,19 ee 1.7.1976 ee habka Maamulka Dalka oo loo wareejiyay X.H.K.S.;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 19 ee 10.4.78 ee lagu habeeyey laguna dhisay Gudiga Ibka iyo Houdhigidda Dhaqaalaha ;

ISAGOO AQOONSADAY : Inay tahay lagama maarmaan in Guddiga Iibka iyo Horudhigidda Dhaqaalaha loo magacaabo qof La-Taliye ah oo dhanka Bankiyada aqoon dheer iyo cilmi u leh ;

ISAGOO TIXGELIYEY : Go'aanka Guddiga Siyaasadda ee X.H.K.S.

WUXUU XEERAYAA :

**Qodobka 1aad**

M A G A C A A B I D

Jaalle Shariif Seyn Abò Imaankiyo oo ahaa Agaasimaha Guud ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, waxaa loo magacaabay La-Taliye dhanka Bankiyada ee Guddiga Iibka iyo Horudhigidda Dhaqaalaha.

XUQUUQDA SHARCIGA IYO DHAQAALAHA

1. Jaalle Shariif Seyn Abò Imaankiyo, wuxuu yeelanayaa dhanka dhaqaalaha xuquuqda ay leeyihiin Guldoomiye Ku-Xigeennada ee X.H.K.S.

**Qodobka 2aad**

DHAQAN GELID

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J.DS.., waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 6.4.1978

Madaxwaynaha J.D.S.
(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Waan aragnay ee Diiwaan gelinay
Diiwaanka lam. bog. 69.
Ku Simaha Hantidhawrka Guud
Muqdisho 29 Maajo 78

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 56 ee 21 Maajo 1978, Hoos u dhigid hal Derejo Cabdullaahi Macallim Maxamed saddexda kale la ganaaxay.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO AKRAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969.

ISAGOO ARKAY : Sharciyada kala ah 1,17,17 iyo 19 ee soo baxeen 1.7.1976 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga L. yahay 29 ee soo baxay 1.4.70 iyo bedelaadii ka dambeysay.

ISAGOO ARKYA : Sharciga L. yahay 14 ee soo baxay 31.1.71:

ISAGOO ARKAY : Xeerka L. 74 ee soo baxay 22.4.1972 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga L. yahay 28 soona baxay 14.2.72 ee lagu dhisay Guddiga Baarista Dacwooyinka Shaqaalaha Dawladda iyo Dadweynaha iyo beeddelaaddii ka dambeysay iyo wareegtada lam. yahay N/SPP/SRC-1-2514 ee 14.2.72 ee faahfaahineyseey hawsha Awoodda Guddigaas.

ISAOGO ARKAY : Go'aanka Guddiga Baarista Dacwooyinka Shaqaalaha Dawladda iyo Dadwaynaha lam. ahaa GB/0076/78 14.5.1978.

WUXUU GUDDOONSHEY IN

Qodobka 1aad

B. CABDULLAAHI MACALLIN MAXAMED hoos loo dhigo hal darajo, isla markaasna laga wareejiyo xilka Waaxda Shaqada ee Wasaaradda Arrimaha Bulshada ee uu isagu Madaxda ka yahay kaddib markii ay caddaatay in uusan wadi karin xilkaas sida ku cad Go'aanka Guddga Baarista Dacwooynka Shaqaalaha iyo Dadweynaha.

T. 1. AXMED JAAMAC AADAN, Ku-Simaha Maareeyaha Guud ee Wakaaladda Gaadiidka Badda.

2. CISMAAN DHEEL CABDULLE, Agaasimaha Waaxda Maamulka iyo Shaqaalaha.

3. MAXAMED WARSAME KHAYRE, Taarwale R.T. ka tirsan Wakaaladda Gaadiidka Badda, la khasiro 1/3 (saddeex meelood meel) midkasta mushaharkiisa bil kasta muddo lix bilood ah sababta oo ah in ay si sharci darro iyo maamulxumo ah shaqo ugu qoreen Khaliif Idriis Cusmaan.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxiixo Jaalle Madaxweynaha JDS waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 21 Maajo 1978.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka Lamb. 1 bogga 59
Muqdisho, 27 Maajo 1978
Ku-Sime Hantidhawrka Guud
Dr. Axmed Shire Maxamuud

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 57 ee 1 Juunyo 78, Magacaabid Maareeyahay Guud ee Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta iyo Gaadiidka Badda.

**MADAXWAYNAHA J.D.S.**

ISAGOO ARKAY: Xaashda 1aad, tan 2aad, iyo tan 3aad ee Kacaanka iyo Sharciga Lam. 1 ee 21kii Oktoobar 1969 ;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. 17,18,19, ee 1dii Luulyo 1976

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lr. 22 ee 23kii Febaraayo 1975 ee lagu dhisay Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta:

ISAGOO ARKAY Sharciga lam. 69 ee 12kii Nofember 1977 ee lagu dhisay Wakaaladda Gaadiidka Badda:

ISAGOO TIXGELINAYA Go,aankii Gudiga Siyaasadda ee Golaha Dhexe ee X.H.K.S. ee 27-28 Maajo 1978 ee lagu mideeyay labadii Wakaaladood ee kala ahaa Wakaaadda Hawlaha Maraakiibta iyo Wakaaladda Gaadiidka Badda.

ISAGOO AQOONSADAY: Baahida loo qabo in Wakaaadda Hawlaha Maraakiibta iyo Gaadiikdka Badda loo magacaabo Maareeye Guud.

**WUXUU XEERIYAY**

Qodobka 1aad

In marka laga bilaabo 1da Juunyo 1978, loo magacaabo Jaalle Cabdulaahi Maxmuud Hiirad Maareeyaha Guud ee Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta iyo Gaadiidka Badda.

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa 1da Juunyo 78, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 1 Juunyo 1978

Madaxwaynaha J.D.S.

(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER WASAARADDA BOOSTA IYO ISGAARSIINTA L. 58 ee 23 Maajo 1978, Samayn tacriifa cusub ee Telekiska Dalka Gudahiisa.

WASAARADDA BOOSTADA IYO ISGAARSIINTA

W A S I I R K A

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan saddexaad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969 ;

ASGAOO ARKAY: Qodobka 9aad ee sharciga Isgaarsiinta lam. 1 soona baxay 22ka Diseember 1975.

ASAGOO ARKAY: Qodobka 4aad ee Sharciga Telekiska Sharci lam. 66 soona baxay 25.9.1971;

ASAGOO TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in loo sameeyo Tacriifada cusub Telekiska Dalka Gudihiisa;

ASAGOO KALA TASHAADY: Wasiirka Maaliyadda;

WUXUU XEERIYAY

Qodobka 1aad

**Qiimaha wacidda Telekiska Dalka Gudihiisa**

Qof alla qofkii doono inuu Teleksika u dirsado Dalka gudahiisa — Magaalo Xamar gudahiida ama — Magaalo ilaa Magaalo —waa inuu bixiyaa qiimaha hoos ku qoran;

| | | | | | | 3dii daqiiqo | | Daq. dheer. |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| XAMAR GUDIHIISA | | | | | Sh. So. | 1,50 | Sh. So. | 0,50 |
| Ilaa | | | 50 | Km. | » | 3,00 | » | 1,00 |
| 51 | Km. | — | 100 | » | » | 4,50 | » | 1,5C |
| 101 | » | — | 200 | » | » | 6,00 | » | 2,00 |
| 201 | » | — | 300 | » | » | 7,50 | » | 2,50 |
| 301 | » | — | 400 | » | » | 9,00 | » | 3,00 |
| 401 | » | — | 500 | » | » | 10,50 | » | 3,50 |
| 501 | » | — | 600 | » | » | 12,00 | » | 4,00 |
| 601 | » | — | 700 | » | » | 13,50 | » | 4,50 |
| 701 | » | — | 800 | » | » | 15,00 | » | 5,00 |
| 801 | » | — | 900 | » | » | 16,50 | » | 5,50 |
| 901 | » | — | 1000 | » | » | 18,00 | » | 6,00 |
| 1001 | » | — | 1500 | » | » | 24,00 | » | 8,00 |
| 1501 | » | — | wixii ka badan | | » | 27,00 | » | 9,00 |

Qodobka 2aad

**Qiimaha Gelinta Telekiska**

Qiimaha Gelinta Telekiska oo iskuduub ah qalabka iyo shaqada la xiriira halkii Telekisba waa Sh. So. 3.400/ (Seddex kun iyo afar Boqol).

Qodobka 3aad

K I R A D A

Kirada istismaalka Telekiska hal makiinaba sannadkii waa Sh. So. 6.000/ (Lixkun oo hormoris loo bixinayo.

Qodobka 4aad

**KIRADA LAYMAHA**

Kirada joogtada ah oo ku xusan qodo. hore, ku isticmaalka Telekiska waxaa kaloo la bixinayaa:

| | | |
|---|---|---|
| Qiimaha gelinta laynka | Sh. So. | 1.000,00 |
| Kirada bisha ee laynka ilaa 15 WPM | » | 2.000,00 |
| Kirada bisha ee laynka ilaa 30 WPM | » | 3.500,00 |
| Kirada bisha ee laynka ilaa 60 WPM | » | 5.000,00 |

Qodobka 5aad

DIGNIIN

Hay,adaha ama Wakaaladaha oo ay mar hore ku isticmaalayeen laymanka Telekiska waxaa lagu dabaqyaa oo ay bixin doonaan Tacriifada Xeerkaan ku xusan.

Qodobka 6aad

Dhaqan gelin

Xeerkaani wuxuu dhaqan gelayaa 1da Juun 78 waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho 23 Maajo 1978

Wasiirka Boostada iyo Isgaarsiinta
Dr. Cabdullaahi Cosobla Siyaad

Dr. Maxamuud Yuusuf Wayrax
Wasiirka Maaliyadda

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka L. 1 Bogga L. 125
Muqdisho, 1.6.78
Ku-simaha Hantidhowrka Guud
Dr. Axmed Shire Maxamuud

XEER WASAARADDA BOOSTADA IYO ISGAARSIINTA L. 59 ee 23 Maajo 1978 Tigidho cusub oo lagu magacaabo Laaji'iinta Falastiin iyo Xuquuqdooda.

WASIIRKA BOOSTADA IYO ISGAARSIINTA

W A S I I R K A

ISAGOO ARKAY: Xaashda 1aadi, tan 2aad iyo 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY : Qodobka 22aad iyo kan 23aad ee Sharciga Boostada lam. 62 soona baxay 22.9.1972;

ISAGOO DHAGAYSTAY: Talada Gudiga Filateliga;

ISAGOO TIXGELINAYO: Baahida loo qabo in la soo saaro tigidho cusub oo lagu magacaabo Laaji'iinta Falastiin iyo Xuquuqdooda.

WUXUU GUDOOMIYEY

Qodobka 1aad

1. In la soo saaro tigidh cusub oo xus ah, laba qiimo ah, midabna leh, laguna magacaabo Laaji'iinta Falastiin iyo Xuquuqdooda. Tigidhada waxaa lagu daabacay Madbacadda (Istituto Poligrafico dello Stato, Roma).

2. Tigidhada waxaa lagu sameeyay xaashiyo aan ahayn Filigaranata qiyaastooduna waxay tahay 30×40 mm. Tigidhada ilkahocda waxay yihiin 14 labadii sentimitirba, tigidhada dhexdoodawaxaa ku yaal Masaajid.

3. Qiimaha iyo tirada tigidhada la daabacay waa:

| | | | |
|---|---|---|---|
| Sh. So. | 0,75 | tirada la daabacay waa | 100.000 |
| Sh. So. | 2,00 | tirada la daabacay waa | 100.000 |

**Qodobka 2aad**

Tigidhada kor ku qoran waxay soconayaan muddo 5 sano ah laga bilaabo 30.4.78 waxayna dhacayaan 30.4.83

Muqdisho 2 3Maajo 1978

Wasiirka Boostada iyo Isgaarsiinta
(Cabdullaahi Cosoble Siyaad)

Dr. Maxamuud Yuusuf Wayrax
Wasiirka Maaliyadda

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka L. 1 Bogga L. 125
Muqdisho, 1.6.78
Ku-simaha Hantidhowrka Guud
Dr. Axmed Shire Maxamuud

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran ;

MARKUU ARKAY : Waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bangiga ;

HADDUU ARAKAY : Qod. 69 D.L.9/9/65 N. 2; lumidda Buug. lamb. 6824, kuna qoran tahay Sh. So. 4.070/— Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe.

WUXUU AMRAYAA :

In loo cusbooneysiiyo Buugga Keydka ka dib markii ay ka soo wareegto 30 (Soddon) maalmood maalinta dekreetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA :

In Buugga cusub ee la sameyn doono gacanta la saaro Xaajiya Faaduma Sheekh Isgow ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada 30 (Soddon) maalmood ah aan kor soo sheegnay.

Muqdisho, 17.6.78

GUDDOM. MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 342

MAXKAMADDA GOBALKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bangiga;

HADDUU ARKAY: qod. 69 D.L.9/9/65 N.2; lumidda Buugga kaydka L. 10206 oy ku qoran tahay di Shs. So 299/ Bangiga Ganacsiga L. 2aad

WUXUU A MRAYAA

In Buugga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro wareegatao 30 maalmood maalnta dekereetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee dawlada.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buugga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Maxamed Afrax Dhiblaawe ama qof isaga ka sita Wakaalad sharci ah, iyadoo la sugaayo mudada 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay;

Muqdisho 1 22 5 78

Gudoomiyaha Maxkamadda G. Banaadir
(Dr. Axmed Sheekh Xasan)

L. 343

MAXKAMADDA GOBALKA HARGAYSA

Dekreto Lamb. 4/78

Garsooruhu
HADDUU ARKAY: dacwadda kor ku xusan,
MARKUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bangiga
HADDUU ARKAY: qodobka 69 D.L.9/9/65 N. 2 iyo lumidda Jeegga wareega Lr. 15283 kuna taallo Sh. So. 4502/50 kuna qoran Qaybta Boliiska G/W/G Hargaysa.

WUXUU A MRAYAA

In 1 oocusboonaysiiyo Jeegga wareega lam. 15283 ka dib markii ay ka soo wareegato 15 maalmood maalinta dekereetada lagu shaaciyo Faafnta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Jeegga wreega lam. 15283 cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Qaybta Boliiska G/W/G Hargaysa ama qof isla isaga ka sita Wakaalad sharci ah ayadoo la sugaayo 15ka maalmood ee aan kor ku soo sheegnay.

Ku Simaha Guud ee Max. Gobalka Hargaysa
Ibraahim Faarax Maxamed

Hargeysa 1.6.78
L. 344

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADDIGA SOOMAALIYA

GUDDOM. MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

HADDDUARKAY: dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bangiga;

HADDUU ARKAY: qodobka 69 D.L.9/9/65 N. 2 lumidda Buugga kaydka lamb. 12.314, kuna qoran tahay lacagta dhan Sh. So. 408/ Bngiga Ganacsiga iyo kaydka L. 2aad.

WUXUU A MRAYAA

In loo cusbboonaysiiyo Buugga kaydka ka dib markii ay soo wareegato 30 maalmood maalinta dekereetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buugga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Madiina Nuur Cali ama qof isla asaga ka sita Wakaalad sharci ah, iyadoo la sugaayo mudada 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho 7 6 1978.

Gudoomiyaha Maxkamadda G. Banaadir
(Dr. Axmed Sheekh Xasan)

L. 345

**MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG GAALKACYO**

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Mudug Gaalkacyo; hadduu arkay weydiintii MAXAMED KULMIYE BARKHADLE taariikhdeeduna ahayd 26.4.78 iyo Xaashida Bangiga Ganacsiga Ummadda Laanta Gaalkacyo taariikhdeeduna tahay 20.6.78da iyo markay aragtay Qodobka 69 D/L 1969 N. 2 waxa caddaatay in Buugga Kaydka lambarkiisu yahay 1685 kuna qoran tahay lacag dhan 302/60 (Saddex Boqol iyo laba Shilin) iyo 60 Senti uu ka lumay buuggaas oo ka furnaa Bangiga Ganacsiga Ummadda Laanta Gaalkacyo.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo mar labaad buuga aan kor ku soo sheegay Mudo 30 beri ah gudahood kana bilaabanta marka lagu dhigo Faafinta Rasmiga ah haddaan la helin cid kale oo sheegata waxaana la farayaa in gacanta laga saaro Jaallaha Magaciisa kor ku xusan yahay ee baraha ah ama qof sita Wakaalad Sharci ah oo isgu uu siiyay ayadoo la sugaayo muddo 30 Maalmood ah.

Gudoomiyaha M. Gobalka Mudug Gaalkacyo
Dr. Siyidii Sheekh Cabdiraxmaan

Galkacyo 21 6 1978

## SHIRKAD CUSUB OO LA DHISAY

Waxaa la dhisay Shrikad sahmi ah ee lagu magacaabo «OCEANTRAC» S.p.A.» saldhigeedu yahay Muqdisho, hantideeduna tahay Sh.So. 10.000/ ujeedadeeduna tahay in ay qabato ayna samayso dhammaan shaqooyinka la xiriira Farsamada makiinadaha iyo dhismaha; Ganacsiga qalabka dayactirka ee Cagafcagafyada iyo Baabuurta; in ganacsi oo cayn kasta ee kale ay ka samayso dalka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga ee Soomaaliya gudahiisa iyo Dibaddiisaba; in Xiriir ay la yeelato Shirkadaha kale ee Ganacsatada ah; in ayadu ay yeelato, dad kalena ay u maamusho, Bakhaarro; iyo in ay qabato shaqo kasta ee kale oo toos ahaan ama si kaleba xiriir la leh kuwa kor ku kala tilmaaman.

Shirkaddaas kor ku magacaaban, waxaa lagu dhisay qoraalka Rasmiga ah lambarkiisu yahay 9759 Reb. taariikhduna tahay 8.2.1978, oo uuqoray Notaayada Dr. Muuse Xuseen Sadiiq laguna soo Diiwaangeliyay Muqdisho maalintii 11.2.78, laguna qoray lamb. 37, Atti Pubblici, Vol. 22.

Shirkaddaas «Oceantrac S.P.A.» waxaa lagu saxiixay go,-aanka Garsooraha Maxkamadda Gobalka Banaadir taariikhdiidsu tahay 15.2.78, waxaana lagu qoray Buugga Shirkadaha lamb. 1317, maalintii 15.2.78, sida sharcigu uu xusaayo.

Muqdisho, maanta oo ah 15 Juunyo 1978.

**WAKIILKA GUUD EE SHIRKADDA**
**VIRGILIO MARANO**

L. 347

## COSTITUZIONE DI SOCIETA'

Con atto a rogito del Notaio Dr. Musse Hussen Sadik N. 9759 di Repertorio, in data 8.2.1978, registrato a Mogadiscio l'11.2.1978 ed iscritto al N. 37, Atti Pubblici, Vol. 22, è stata costituita la società per azioni denominato «OCEANTRAC» S.p.A.»,

con sede in Mogadiscio, e con il capitale sociale di Sh. So. 10.000/-. La società suddetta ha per oggetto: l'esecuzione di tutti i lavori relativi e connessi alla meccanica ed alle costruzioni; il commercio dei ricambi dei trattori, macchinari, ed autoveicoli; l'esercizio del commercio di qualsiasi altra natura e genere nell'ambito del territorio della Repubblica Democratica Somala ed all'estero; l'intrattenimento di rapporti con ditte e case commerciali; la gestione, sia in proprio che per conto di terzi, di magazzini e depositi; e l'esercizio di qualsiasi altra attività direttamente o indirettamente connessa a quelle sopra specifcate.

La società «Oceantrac S.p.A.», è stata omologata con provvedimento del giudice del Tribuanale Regionale del Benadir in data 15.2.1978; ed iscritta nel Registro delle Imprese al N. 1317 in pari data 15.2.1978, ai sensi di legge

Mogadiscio li 12 Giugno 1978.

IL PROCURATORE GENERALE
VIRGILIO MARANO

L. 347

SHIRKADDA «MORODI» — S.p.A.

oo Saldhiggeedu yahay Muqdisho (J.D. Soomaaliya) Ra'asumaalkeeduna yahay Sh. So. 2.000.000,00

**OGEYSIIS ISU YEERID FADHI CAADI AH**

**IYO MID AAN CAADI AHEYN**

Sahmiilayaasha Sharikadda «MORODI» waxaa la isugu yeeray shirar caadi ah iyo mid aan caadi ahayn oo lagu qaban doono Xamar, Xafiiska Rag. Arturo Salvi, maalinta 26 Luuliyo 1978, saacaddu markay tahay 9ka subaxnimo fadhiga ugu horreeya, haddii fadhigaas suura galiwaayo, waxa mar labaad la isugu imaan doonaa maalinta 27 Luuliyo 1978 isla saacadda iyo isla meesha kor lagu sheegay si go'aan looga gaaro arrimaha soo socda :

**BARNAAMIJKA DOODDA**

**Fadhiga Caadiga ah :**

1) Magacaabidda Guddiga Maamulka, iyadoo la xaddidaayo tiradooda ;

2) Magacaabidda Guddiga Baarayaasha sida oo sharcigu qabo

**Fadhiga aan Caadiga ahayn :**

1) In la saa'idiyo muddada Sharikadda ay soconeyso. Waxa xaq u leh in ay shirarka ka soo qayb galaan, sahmilayaasha ku qoran buugga xubnaha Sharikadda shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qabanaayo, ama keeno waqtigaas gudihiisa sahmiyaashooda Saldhigga Sharikadda ee Muqdisho, amase Xafiiska Rag. Arturo Salvi ee Muqdisho.

GUDDIGA MAAMULKA

L. 348

SOCIETA' PER AZIONI «MORODI» - SEDE IN MOGADISCIO

Capitale Sociale inter. versato Sh. So. 2.000.000.-

**AVVISO DI CONVOCAZIONE**

Gli Azionisti della società per azioni «MORODI» sono convocati in Assemblea Ordinaria e Straordinaria in Mogadiscio, presso lo Studio Commerciale Rag. Arturo Salvi, il giorno 26 luglio 1978, alle ore 9,00 in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione il giorno 27 luglio 1978, alla stessa ora e nello stesso luogo, per discutere e deliberare sul seguente :

**ORDINE DEL GIORNO**

**Parte Ordinaria :**

1) Nomina del Consiglio di Amminstrazione previa determinazione del numero dei suoi membri ;

2) Nomina del Collegio Sindacale a norma di legge.

**Parte Straordinaria :**

1) Proroga della durata della Società.

Avranno diritto di partecipare all'Assemblea gli Azionisti iscritti nel Libro dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l'Assemblea o che entro lo stesso termine abbiano effettuato il deposito delle loro azioni presso la Sede Sociale Studio Rag. Arturo Salvi in Mogadiscio.

IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

L. 348